

Dib-ugu Celinta Fasalka Saddexaad: Foomka Talo-bixinta Racfaanka Sababta 1

Iyadoo la raacayo Xeerka T.C.A. § 49-6-3115 iyo Xeerka Guddiga Waxbarashada ee Gobolka (SBE) 0520-01-03-.16, waalidka ama masuulka sharciga ee ardayga kaas oo loo arkay in lagu celiyo fasalka saddexaad iyada oo lagu salaynayo in ardayga uu gaarayo qiimaha heerka waxkeenka ee uu “ku gaarayo” qaybta ELA ee imtixaanka ugu dambeeyay ardayga ee TCAP, wuxuu si toos ah racfaan ugu gudbin karaa Waaxda.

Waxyaabaha loogu baahan yahay racfaanka Sababta Koowaad waxaa ka mid ah:

- In waalidka ama masuulka sharciga ah ay oggolaadaan in la siiyay dhammaan ogeysiiska shuruudaha racfaanka Sababta Koowaad oo ay oggolaadeen in ardaygoodu uu raaci doono dhammaan shuruudaha haddii go'aanka dib-ugu-celinta la beddelo.
- Ardaygu wuxuu keenaa meel ah ama ka sarreysa boqolkiiba afartan (40tan) ee maamulka guga ee TN-URS (AimswEB) oo ay maamusho dugsiga LEA ama dugsiga xeerka gaarka ah leh ee dadweynaha.
- Maamulaha dugsiga ardayga wuxuu oggol yahay inuu diyaariyo qorshe waxbarasho oo lagu taageerayo ardayga, isagoo la kaashanaya macallimiinta ardayga, koox IEP ama 504 ah haddii ay suurogal tahay, ardayga. Qorshaha taageerada waxbarasho ee lagu saxayo daldaloolada wuxuu ka koobnaan doonaa xeelado ku saleysan caddeyn cilmiyeed iyo talooyin ka imanaya waalidiinta ardayga iyo shaqaalaha dugsiga ee ku habboon.
- Macallinka ELA hadda ee ardayga iyo maamulaha dugsiga ayaa talo bixin wadajir ah in ardayga loo dalacsiiyo fasalka 4aad.
- LEA-da ardayga ama iskuulka xeerka gaarka ah leh ee dadweynaha ayaa oggolaanaya inay siiyaan ardayga adeegyo waxbarid gaar ah oo tayo sare leh laguna bixiyo kooxo yar oo arday ah iyada oo la eegayo dhammaan sanad-dugsiyeedka fasalka afraad (4aad) ee ardayga.

Si loo gudbiyo racfaanka Sababta 1aad, waalidka ama masuulka sharciga ah, ama maamul dugsi oo haysta oggolaansho qoraal ah asiga oo ku hadlaaya magaca waalidka ama masuulka sharciga ah, wuxuu ku gudbin karaa foomka racfaanka bogga [Waxbarashada la Dedejiyay \(Learning Acceleration\)](#) ee Waaxda.

Marka la gudbinayo racfaanka, qofka gudbinaya wuxuu u baahan doonaa inuu soo geliyo bogga saxiixa ee uu buuxiyay maamulaha dugsiga iyo macallinka ELA-da si loo muujiyo inay ku heshiiyeen shuruudaha la sheegay ee racfaanka.

Foomka Saxiixa Racfaanka Sababta 1aad

Magaca Sharciga ah ee Ardayga

Magaca Degmada Dugsiga

Aqoonsiga Ardayga (7 lambar oo tiro ah)

Magaca Dugsiga

Oggolaanshaha Maamulaha Inuu Soo Saaro Qorshaha Taageerada Waxbarasho ee lagu Saxayo Daldaloolada, Uu Bixiyo Waxbarid, iyo Talo-bixin ku saabsan U-dalacsiinta Fasalka Afraad

[Xeerka Guddiga Waxbarashada Gobolka \(SBE\)](#) wuxuu u baahan yahay in maamulaha iskuulka ardayga uu oggolaado in la sameeyo qorshaha taageerada waxbarasho ee lagu saxayo daldaloolada si loogu caawiyo ardayga halista ugu jira in lagu celiyo fasalka. Qorshaha taageerada waxbarasho ee lagu saxayo daldaloolada waa in lagu diyaariyaa iyada oo iskaashi lala yeelanayo macallimiinta ardayga, koox IEP ama 504 ah haddii ay suurogal tahay, oo waxaa sidoo kale lagu dari karaa talooyinka waalidka ardayga, la-taliyaha iskuulka, ama shaqaalaha kale ee ku habboon. Qorshaha taageerada waxbarasho ee lagu saxayo daldaloolada wuxuu ka koobnaanayaa xeelado cadeymo-ku-saleysan oo la waafajiyay baahiyaha waxbarasho ee ardayga. Xeeladahan cadeymaha-ku-saleysan waa inay ugu yaraan ku jiraan mid ka mid ah qodobadan soo socda:

- I. Wax-ka-beddel lagu sameeyo xeeladaha waxbaridda ee hadda jira ama agabka waxbarasho ee tayo sare leh;
- II. Waqti dheeri oo waxbarasho ah;
- III. Wax-ka-bedde lagu sameynayo layliga fasalka ee ardayga si loo hubiyo in ardayga uu ka helo waxbarida macallin heer waxtarnimo sare leh (heerka 4aad) ama si aad uga sarreysa heerka la filayay (heerka 5); ama
- IV. In ardayga lagu meeleeyo fasal ay ardaydu ku yar yihiin.

Xeerka SBE wuxuu sidoo kale farayaa in LEA-da ama iskuulka xeerka gaarka ah leh ee dadweynaha ay oggolaadaan in ay bixiyaan waxbarid joogto oo tayo sare leh laguna bixiyo kooxo yar dhammaan ardayda ku jirta sanad-dugsiyeedka afraad.

Sidoo kale xeerku SBE wuxuu farayaa in maamulaha hadda ee ardayga uu bixiyo ka talabixin si ardayga loogu dallacsiyo fasalka 4aad.

Saxiixaaga halkan wuxuu muujinayaa tal-bixinta aad ka bixisay ardayga in loo dallacsiyo fasalka 4^{aad} iyo oggolaanshahaaga ku aaddan qodobbada kor ku xusan.

Talo Bixinta Macallinka ELA-da ee ku aaddan Dallacsiinta Fasalka Afraad

Xeerka SBE wuxuu farayaa in macallinka ELA-da ee hadda uu bixiyo talo-bixin in ardayga loo dallacsiyo fasalka 4aad.

Saxiixaaga halkaan wuxuu muujinayaa talo-bixinta aad ka bixisay ardayga in loo dallacsiyo fasalka 4aad.

Magaca Macallinka ELA Saxiixa Macallinka ELA Taariikhda